



KU SOCOTA WAALIDIINTA:  
ILMAHAAGU  
WAXA UU KU GUSBAY  
TIJAABADA MAQALKA EE ILMAHA DHASHA



Magaca Ilmaha: \_\_\_\_\_  
(Baby's Name):

Taariikhda Dhalashada Ilmaha: \_\_\_\_\_  
(Baby's Date of Birth):

Isbitaalka: \_\_\_\_\_  
(Hospital):

Taariikhda markii ugu dambaysay ee lagu sameeyey tijaabada maqalka:  
(Date of Last Hearing Screen): \_\_\_\_\_

Dhagta Midig:  KU GUSBAY  
(Right Ear): (PASS)

Dhagta Bidix:  KU GUSBAY  
(Left Ear): (PASS)

HUBINTA MAQALKA ILMAHAAGA WAA MUHIM ISLA  
MARKAANA WAA MID AAD FUDUD SIDA 1, 2, 3!

1. Ilmahaagu waa ku gusbay tijaabada maqalka, laakiin waxaa muhim ah in aad ogaato in maqalka ilmahaagu uu is bedel ku imaan karo.
2. Hadalka iyo maqalka waa kuwo bilowda in ay koraan marka ilmuhu dhasho kadib, inkastoo aaney ilmuhu inta badan hadlin illaa ay ka gaaraan hal sano. In la ogaado in ilmuhu aanu wax maqlayn waa mid muhim ah isla markaana ilmaha laga caawin karo marka la ogaado in aanu wax maqlayn.
3. Haddii aad u malayeyso in ilmahaagu aanu wax maqlayn mustaqbalka, la xiriir xarunta caafimaadka ama dhakhtarka. Macluumaadka ku qoran boggan dhinaciisa kale ayaad ku ogaan kartaa sida loola socdo sida uu isu bedelayo (korayo) maqalka iyo hadalka ilmahaaga.



# Maqalka Ilmahaaga

## KALA HADAL DHAKHTARKA ILMAHAAGA

Wargeli dhakhtarkaaga ama shaqaalaha xarunta caafimaadka haddii aad mid ka mid ah waxyaabaha hoos ku xusan aad ku aragto ilmahaaga hadda iyo mustaqbalkaba:

- Labada waalid mid ka mid ah ama qof qaraabada ah oo aan wax maqli jirin markii uu yaraa
- Ilmahaaga oo lagu hayey meesha la geeyo ilmaha u baahan daryeelka gaarka ah (NICU) wax ka badan 5 cisho markii uu dhashay
- Ilmahaaga oo dheecaan ama dhiig lagu shubay
- Ilmahaaga oo dhago xanuun (ear infections) uu marar badan ku dhacay
- Ilmahaaga oo madaxa jug ka gaartey (dhaawacmay)
- Waxa aad u maleyneysaa in ilmahaagu aanu si hagaagsan wax u maqlayn
- Waxa aad u maleyneysaa in ilmahaagu aanu si hagaagsan u hadleyn
- Ilmahaaga sida uu u dhaqmayo in ay ka duwan tahay sida ku xusan shaxda hoose

Da'da	Dabeecadda laga filii karo*
0-3 bilood	Baraaruga ama cod dheer ku ooyaa. Aamusa marka uu maqlo codad uu garanayo. Dhaqdhaqaaqaa ama kor u hinqadaa marka qof hadlo.
3-6 bilood	Waxa uu sameeyaa codad kala duwan. Waxa uu milicsadaa dhinaca uu cod dheer ka maqlo. Waxa uu jeclaystaa codadka ay sameeyaan waxyaabaha ay ilmuhu ku ciyaaraan.
6-12 bilood	Waxa uu bilaabaa inuu ku hadaaqo waxyaabaha uu maqlo sida (“baba”, “mama”). Waxa uu fahmaa marka la dhaho “Maya” ama (nabadeey “bye-bye.”). Waxa uu madaxa u weeciyaa codadka dabacsan. Waxa uu fiiriyaa marka uu maqlo magacyada alaabta uu yaqaan.
12-18 bilood	Wuu u jeestaa dhamaan codadka uu maqlo. Waxa uu aqoonsadaa magacyada isla markaana waxa uu garan karaa ilaa 50 eray. Waxa uu ka gudbaa inuu hdihi karo 2 eray isaga oo u gudba ilaa 10 eray. Waxa uu raacaa timaamaha fudud ee la siiyo (“soo qabo kubadda”) oo kale.
18-24 bilood	Waxa uu jeclaystaa in wax loo akhriyo. Waxa uu tilmaami karaa xubnaha jirka marka la weydiyo. Waxa uu bilaabaa inuu isu geeyo erayada sida “caano kale “dheeraad ah.” Waxa uu dhihi karaa ilaa 20-50 eray isaga oo ka badana fahmi kara.

\* Waxaa laga soo minguriyey AAP/AAA